



**Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska
ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Tirada:
10-200

Majallada 10aad- Baaritaanada

Hab-raaca Baaritaanka

10-216 Markhaatiyaal
(11/07/22)

I. Ujeedo

- A.** Markhaatiyadu waxay bixiyaan waajibaad dadweyne oo muhiim ah iyadoo ka caawinaya in la ogaado runta baaritaanka. Waxa laga yaabaa in ay waqtigooda bixinayaan, xaaladaha qaarkoodna, waxa laga yaabaa in ay khatar gelinayaan ammaankooda si ay caddayn u bixiyaan
- B.** Ujeeddada siyaasaddan waa in la hubiyo in marqaatiyada loo wajaho si ixtiraam iyo dastuuri ah.

II. Siyaasadda

A. Xarigga

1. Markhaatiyaasha laguma xidhi karo ama lama qaban karo, kaliya inay dembi markhaati ka yihiin (iyada oo aan loo eegin inta uu le'eg yahay) marka laga reebo waaran ama amar maxkamadeed.
2. Shaqaalaha codsanaya inay la hadlaan markhaati ama markhaati macquul ah waa inay qofka ku wargeliyaan inaan la xidhin oo ay xor u yihiin inay baxaan wakhti kasta.
3. Joojinta baadhista iyo xidhista kale waa inay raacaan siyaasadaha baadhitaanka iyo siyaasadaha la wareegidda ee P&P 9-200. Xadhig kasta oo baadhiseed waa inuu ahaadaa mid ku meel gaadh ah oo aanu soconin in ka badan intii loo baahnaa si loo dhaqan geliyo ujeeddada xadhiga.
4. Haddii qofka markhaatiga ah loo xidhay si waafaqsan nidaamka P&P 9-201, laakiin la go'aamiyo in aan lagu tuhmin fal-dembiyeed, waa in lagu wargeliyaa in wada shaqayntoodu ay tahay mid ikhtiyaari ah oo ay xor u yihiin in ay baxaan wakhti kasta.

B. Aqoonsiga

1. Markhaatiyaasha laguma qasbi karo inay bixiyaan aqoonsi, sababtoo ah waxay markhaati u yihiin dembi.

1. Aqoonsiga waxaa laga yaabaa in laga codsado markhaati ama markhaati macquul ah, iyadoo la raacayo siyaasado iyo habraacyo kale, laakiin markhaatiyaasha lagama rabi karo inay bixiyaan.

C. Iskaashi ikhtiyaari ah

Shaqaaluhu waxay sugi karaan iskaashiga ikhtiyaariga ah ee markhaatiyada, iyadoo dabaqaya mabaadi'da cadaaladda (sida uu qabo P&P 5-104)

1. Isbarashada ama aqoonsiga muwaadinka oo u sharax sababta loola xidhiidhi karo sida ugu dhakhsaha badan (P&P 5-104).
2. Weydiinta wada shaqaynta qofka.
3. Bixinta macluumaadka waxa dhici doona ee xiga.
4. Bixinta gaadiidka sida loogu baahdo.

D. Goobta Waraysiga

1. Haddii muwaadin markhaati ah uu ogolaado waraysi, baaraha waxa uu codsan karaa in waraysiga lagu qabto qol waraysi oo la kormeero oo duuban, haddii ay xaaladdu khusayso.
2. Haddii waraysiga goobta ka baxsan aanu khusayn, ama haddii markhaatigu uu doorbido, waraysiga waa in lagu qaadaa goobta (sida gudaha ama dibadda Gaariga).
3. Haddii lagu qabanayo waraysi meel ka baxsan goobta, baaraha waa inuu diyaaraa gaadiid lagu baxo oo loogaga soo noqdo goobta waraysiga, sida uu markhaatigu u baahdo.
4. Baarayaashu waa in ay hubiyaan in marqaatigu heli karo musqul, biyo ama waxyaabo kale oo ay u baahan karaan, sida xaaladdu u saamaxdo.